Oregon Department of Transportation

123 NW Flanders St
Portland, OR 97209

# Mashruuca I-5 ee dulmarta SW 26th Avenue

*Xagaagan:* **waxaa la xiri doonaa I-5 dhamaadka usbuuc ee SW Portland**

**ODOT waxay bedelaysaa buundada I-5 ee dulmarta SW 26th Avenue waxayna hagaajinaysaa SW 26th Avenue.**

- Dhammaan dariiqyada I-5 waxay xiri doonaa ee 4 mayl inta u dhaxaysa SW Terwilliger Boulevard off-ramps iyo on-ramps hal dhammaadka usbuuc xagaagan, 28-ka Juun ilaa 1-da Luulyo.
- Toddoba I-5 ramps ayaa la xiri doonaa sidoo kale.
- SW 26th Avenue ee hoos timaada I-5 ayaa la filayaa inay dib loo furo gu'gan.

Waad ku mahadsan tahay dulqaadkaaga inta lagu jiro saameynta safarkan ***(tafaasiisha gudaha).***

**Booqo websaydka mashruuca wixii ku soo kordha iyo macluumaad dheeraad ah: bit.ly/swi-5repair**

## Mashruuca I-5 ee dulmarta SW 26th Avenue

ODOT waxay hagaajinaysaa I-5 ee dulmarta SW 26th Avenue ee Portland si ay u ilaaliso isku halaynta joogtada ah ee socotada.

Waxaan ku bedeli doonaa buundada hadda jirta qaab dhismeed cusub, oo la hagaajiyay, waxaanan ku cusboonaysiin doono SW 26th Avenue nal ka sii wanaagsan, haad baaskiil iyo waddooyin lugeed.

### Su'aalo ama Faallooyin

Ellen Waters *Arimaha Bulshada*
**971-336-1249**
**Ellen.WATERS@odot.oregon.gov**

Walaac Buuq? Ka wac khadka telefoonka 24/7 ee buuqa habeennimo: **503-276-7892**

Websaydka Mashruuca: **bit.ly/swi-5repair**

For ADA Title II or Civil Rights Title VI accommodations, translation/interpretation services or for additional information call 503-731-4128, TTY (800) 735-2900 or use the statewide Oregon Relay Service: 7-1-1.

¿Habla usted español? Podemos proveer la información en esta publicación en español. Para recibir la información en español, por favor llamé al (503) 731-4128.

Qorshayaasha, adeegyada turjumaada/fasiraada, ama wixii macluumaad dheeraad ah ee ADA Title II ama Xuquuqda Madaniga Title VI wac 503-731-4128, TTY (800) 735-2900 ama isticmaal Adeegyada Gudbinta Wararka: 7-1-1.

م راف ق ق ان ون ال م ع وق ي ن ال ج زء اا أو ال ح ق وق ال م دن ي ة ال ج زء
زي د م ن ال م ع ل وم ات ي رج ى اال ت ص ال ب ال رق م ل ل ح ص ول ع ل ى
ك ات ب ة 800-735-2900 أو اس ت خ دم VI، أو خ دم ات ال ت رج م ة أو ال م
اء وال ي ة اوري غ ون ع ل ى ال رق م 711 503-731-4128، أو ال م ب رق ة ال
خ دم ة ال م ح ول ف ي أرج

Qorshayaasha, adeegyada turjumaada/fasiraada, ama wixii macluumaad dheeraad ah ee ADA Title II ama Xuquuqda Madaniga Title VI wac 503-731-4128, TTY (800) 735-2900 ama isticmaal Adeegyada Gudbinta Wararka: 7-1-1.

Oregon Department of Transportation

# Mashruuca I-5 ee dulmarta SW 26th Avenue

GU'GA 2024

*Xagaagan:* **waxaa la xiri doonaa I-5 dhamaadka usbuuc ee SW Portland**

ThBuundada I-5 ee dulmarta SW 26th Avenue waxaa la dhisay 1959-kii waxaana la balaariyay 1980-meeyadii. Waxay qaadaa in ka badan 100,000 oo baabuur maalintii. Sagxaddeedu aad bay u duugowday waxayna ku dhowdahay dhammaadka cimrigeeda waxtarka leh. Mashruucani waxa uu bedelayaa buundada duugowday si ay u fududaato ku socodkeeda iyo in ay fuliso heerarka badbaadada seismic ee hadda jira.

## I-5 xiritaanka dhamaadka usbuuc

Laga bilaabo Jimcaha, 28-ka Juun saacadu markay tahay 9 galabnimo ilaa Isniinta, 1-da Luulyo markay tahay 5 subaxnimo, I-5 waxa si buuxda loo xiri doonaa in ka badan 4 mayl si shaqaaluhu u dhamaystiraan shaqada.

- Southbound I-5 ayaa laga xiri doonaa inta u dhaxaysa SW Terwilliger Boulevard off-ramp iyo SW Capitol Highway on-ramp.
- Northbound I-5 ayaa laga xiri doonaa inta u dhaxaysa SW Barbur Boulevard off-ramp iyo SW Terwilliger Boulevard on-ramp.

***Gudaha ka eeg maabka leexashada.***

Dhawr ka mid ah on-ramps ayaa sidoo kale la xiri doona si ay uga hortagaan darawalada inay fuulaan I-5 aagga inta lagu jiro xiritaanka.

**Xiritaanka on-ramp ee Southbound:**
- S Harbor Drive.
- Isdhaafsiga wadada isu xirta 405 ee Southbound ilaa Southbound I-5.

**Xiritaanka on-ramp ee Northbound:**
- Kruse Way.
- SW Spring Garden Street.
- SW Capitol Highway.
- OR 99W/SW Barbur Boulevard.
- SW Haines Street.




## Taariikhda Xiritaanka waa lagu dhawaaqay!

ODOT waxay kala shaqaynaysaa qandaraaslaha si loo go'aamiyo taariikhda saxda ah ee xiritaanka dhamaadka usbuuca. Xiritaanku wuxuu dhici doonaa dhammaadka usbuuca 28ka Juun – 1da Luulyo waxaana lagu wadaagi doonaa websaydka mashruuca, kaarka boostada iyo iimaylka.

Hubi inaad gasho liiska cusboonaysiinta iimaylka ee ogeysiisyada xiritaanka iyo isbedel kasta oo suurtagal ah.



**Booqo shabakada mashruuca si aad isu diiwaan geliso wixii ku soo kordha: bit.ly/swi-5repair**

## Habka Dhismuhu Wuxuu Yareeyaa Saamaynta

Beddelka buundada waa qaali, waqti badan qaadanaysa waxayna carqalad ku noqon kartaa isu socodka iyo bulshada ku xeeran. Si loo yareeyo saamaynta, waxaanu qiimaynay xulashooyinka oo aanu dooranay midka leh kharash yar, waqtiga dhismaha oo gaaban, saamaynta taraafikada oo yar, buuqa habeenkii oo yar, saamaynta deegaanka oo yar iyo leh badbaadada shaqaalaha iyo darawalada oo la wanaajiyay.

Shaqadu waxay ka bilaabatay buundada I-5 ku dhawaad sanad ka hor. Waxaan isticmaalaynaa hab dhisme oo ku hoos dhisaya buundada cusub buundada sii jirtay iyadoo I-5 ay weli furan tahay. Xagaagan, waxaanu ku dhamayn doonaa shaqada anagoo ka saarayno dusha sare ee buundada sii jirtay oo aanu ku kordhinayna daamur cusub oo laami ah – dhammaan inta lagu jiro hal dhamaadka usbuuc oo buuxa.

## SW 26th Avenue oo La Hagaajiyay ayaa La Furi Donaa Gu'gan

Gu'gii hore, SW 26th Avenue waxaa laga xiray baabuurta mootooyinka I-5 hoosteeda iyo SW Barbur Boulevard. SW 26th Avenue ayaa la filayaa inay dib u furanto gu'gan.

**SW 26th Avenue ayaa mar kale xirmi doonta inta lagu guda jiro xiritaanka I-5 dhamaadka usbuuca ee gelitaanka qalabka iyo si loo hubiyo badbaadada inta shaqadu kor ka dhacayso.**

SW 26th Avenue waxay yeelan doontaa hagaajinta soo socota:

- Dhinacyada qaab-dhismeedka waa la buuxin doonaa, hab la mid ah muuqaalka qulqulka ama tunnelka (eeg tusaalaha). Boston Ivy (aan duulaan ahayn) ayaa lagu beeri doonaa dhinacyada qaab-dhismeedka si ay uga caawiso jilcinta muuqaalka shubka, ku dhex milanto eesha cagaarka ah ee u dhow, iyo joojinta qoraallada.
- Lix ilaa siddeed nalal ayaa lagu rakibi doonaa gudaha qaab-dhismeedka si loo hubiyo in ay si fiican u shidan tahay badbaadada.
- Dadku waxay heli doonaan meel ballaadhan oo ay ku socdaan, baaskiil ku wadaan ama ku duubaan.

**Websaydka Mashruuca:**
**bit.ly/swi-5repair**

## Wadashaqeynta PBOT

ODOT waxay kala shaqaynaysaa Xafiiska Gaadiidka ee Portland walxaha mashruuca ee saameeya SW 26th Avenue. Tan waxa ku jira isku xidhka dariiqa cusub ee isticmaalka badan ee PBOT ay dhisayso iyada oo qayb ka ah Mashruuca Buuxinta ee OR 99W/SW Barbur Blvd aagga laamiyo iyo ku darista haad baaskiil oo cusub oo ku yaal SW Barbur Court.

## Saamaynta Dheeraadka ah ee Waqtiga habeenkii ee I-5

Si loogu diyaargaroobo oo loo dhammeeyo shaqada beddelka buundada hab badbaado leh oo leh saamaynta taraafikada ugu yar, shaqo dheeraad ah oo waqtiga habeenkii ah ayaa loga baahan yahay I-5. Tan waxa ku jiri doona xiritaanka haadka ee I-5.

Filo waxyaabaha soo socda:

- **Ilaa 10 jeer xiritaanka waqtiga habeenkii jihada ee I-5 (shan northbound iyo shan southbound) laga bilaabo 11 galabnimo ilaa 5 subaxnimo.**
- Xiritaanka Haadka kaliya ee waqtiga habeenkii ee I-5 labada jiho, laga bilaabo 8 galabnimo ilaa 5 subaxnimo maalmaha shaqada iyo 8 galabnimo ilaa 8 subaxnimo maalmaha fasaxa ah.
- •90 maalmood gudahooda ee xiritaanka dhamaadka usbuuca, gudaha iyo agagaarka aagga mashruuca ee I-5 waxay yeelan doontaa ilaa 30 habeen oo xiritaan labanlaaban haad ee labada jiho ah.



Horumarka hadda ee dhismaha

Sawir gacmeedka hagaajinta SW 26th Avenue iyo qaab dhismeedka cusub, oo laga eegay SW 26th ee eegaya koonfur bari.



## Wadooyinka Leexashada ee Xiritaanka I-5

Laga bilaabo Jimcaha, 28-ka Juun saacadu markay tahay 9 galabnimo ilaa Isniinta, 1-da Luulyo markay tahay 5 subaxnimo, I-5 waxaa laga xidhi doonaa labada jiho in ka badan 4 mayl.

Leexasho maxalli ah oo saxeexan ayaa isticmaali doona SW Barbur Boulevard. Weecashadani waxay ilaalisaa gelitaanka maxalliga ah waxayna yaraynaysaa leexinta iyadoo ka ilaalinaysa darawallada ka imanaya waddooyinka waaweyn ee kale inay dhex gooyaan koonfur-galbeed Portland.

Saxmadda ayaa la filayaa inta lagu jiro dhamaadka usbuuca ee si buuxda loo xirayo I-5. Xiritaanka ramp ayaa lagu faahfaahiyay xagga hore.




Wareegyada gobolku waxay isticmaali doonaan Interstate 205 iyo OR 217.




Booqo shabakada mashruuca si aad isu diiwaan geliso wixii ku soo kordha: **bit.ly/swi-5repair**

## Wareegyada Inta lagu jiro Xiritaanka I-5

- Aagga mashruuca
- Xiritaanka 4-mayl ee jidka weyn
- Waddada leexashada southbound ee maxalli ah
- Waddada leexashada northbound ee maxalli ah
- Waddada leexashada northbound iyo southbound ee gobolka ah

- Southbound I-5 ayaa laga xiri doonaa inta u dhaxaysa SW Terwilliger Boulevard off-ramp iyo SW Capitol Highway on-ramp.
- Northbound I-5 waxay xiri doontaa inta u dhaxaysa SW Barbur Boulevard off-ramp iyo SW Terwilliger on-ramp.